

Cunto khaas ah iyo cunto habboon

Cunto khaas ah iyo cunto habboon waxaa la siiyaa dad sababo caafimaad, diimeed ama dhaqan dartiis aan u cuni karin cuntada caadiga ah. Si martida naga cunteeya ay u heelaan cunto sax ah waxaa loo baahan yahay in aad codsiga baahidaada cunto khaas ah ama cunto habboon ku soo gudbisid halkaan e-tjänsten, <https://sjalvservice.falkoping.se/specialkost>. [Länk till annan webbplats.](#)

Waxaad naga heleysaa:

Cunto khaas ah sabab caafimaad darteed, macnaha marka martida cuntada cuno uu jir ahaan ku xanuunsanayo cuntada. Dalabka waxaa lagu adkeynayaa cadeyn dhakhtar, diiwaanka la socodka caafimaadka (www.1177vardguiden.se) ama cadeyn cuntayahan.

Cunto habboon macnaha cuntada khudaarta, (kuwa ka caagan hilibka), Khudaar, cunto aan doofaar ku jirin ama cunto uu ku yaryahay laktoosku. UMA BAAHNID wax cadeyn dhakhtar ah, cuntoyahan ama diiwaanka la socodka caafimaadka si aad u heshid cunto habboon, balse waxaad u baahan tahay in aad diiwaan gelisid. Si loo habeeyo cuntada/goobta lagu cunteeyo sababo naafanimo maskaxeed, kala xiriir maamulaha.

Adiga ayaa masuulka ka ah cusbooneysiinta diiwaan gelinta marka canuggaagu bilaabayo xanaanada, fasalka bilowga, fasalka 4, 7 iyo dugsiga sare, sidoo kale diiwaan gelin degdeg ah marka isbedel dhaco, cadeynta dhakhtar, cuntayahan ama diiwaanka la socodka caafimaadka waa la soo raaciyaa, Xitaa shaqaaluhu way diiwaan gelinayaan cuntada khaaska ah.